



## Warar & Qoraalo: PTA-ga Scott oo uu sharfay Kormeeraha Guud; ciyaartooyda PIL oo ku guuleystay horyaalada ciyaarada fudud ee gobolka; waxyaabo dheeraad ah

Qof kasta oo ka qayb galay kulankii PTA ee ka dhacay Dugsiga Hoose ee Scott waxaa hubaal ah in uu la yaabay wada hadalkii -- Isbaanishka ku baxayay, ee qalabka dhagaha ee wax lagu dhageysto la isticmaalayay si loo bixiyo turjumaad ah dhanka Ingiriisiga. Habka qorshaha loo dejiyay wuxuu ahaa in qoysaska ku hadla Ingiriisiga la tuso waxa ay dareemaan qoysaska ku hadla Isbaanishka iyo Soomaaligu ka qayb galka kulamada ku baxaya Ingiriisiga.

Dadaalka PTA-ga Scott ee ah in lagu daro ayaa ahayd sababta u weyn ee Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero u sharfay kooxda si ay noqdaan kuwa helay Abaalmarintii Kormeeraha Guud ee 2019-ka iyaga oo ku helay Xafladdii Tabarucayaasha PPS/PTA ee Barnaamijka Self Enhancement Inc.

“Waxaan ahayn maamule nasiib badan in aan yeesho koox waalidiin ah oo noocan oo kale ah oo dadaal iyo wada shaqeyn leh oo wax badan u qabta dugsiga,” ayay sheegtay Megan McCarter, maamulaha Scott. “PTA-ga Dugsiga Scott waa kuwo isbeddel u leh ardayda iyada oo la adeegsanayo hal-abuurnimo, ka qayb qaadashada bulshada, lacag ururin iyo shaqo dhanka tabaruca ah oo aan hagrasho lahayn.”

Kormeeraha Guud Guerrero ayaa sidoo kale soo bandhigay sharaf/maamuus cusub, Abaalmarinta Dhanka Aragtida, taasi oo diiradda lagu saaro hoggaamiyayaasha dhanka tabaruca ee dadka tusaalaha u ah isla markaana muujiya siyaabo cusub oo wax loo qabanayo. Abaalmarintu waxay aaday Fred Smith iyo Keiona Connor, oo si wadajir ah madax uga ah PTA-ga Dugsiga César Chavez K-8.

“Kani kaliya waa sanadkii saddexaad ee César Chavez ay yeelato PTA, iyada oo Fred iyo Keiona ay hoggaanka hayeen labadii sano ee la soo dhaafay, ayuu sheegay Guerrero. “Waxay isku keenaan bulshada dugsiga ee kala duwan iyaga oo ah kuwo dhaqan ahaan jawaab ka bixiya isla markaana ah hoggaamiyayaal wakiilo ah.”

Marka lagu daro abaalmarinadan, Guddiga PTA ee Portland, oo ay PPS iska kaashanayeen xafladda, ayaa dhacdada ku soo bandhigay saddex abaalmarinood:

- **Macallinka Sanadka:** Nicole Dalton ayaa ku guuleysatay taasi oo la xiriirta shaqada ay hayso ee ah Isku duwaha Kulliyadda iyo macallin barnaamijka Shaqada Dhaafsiisan Dugsiga oo ay ka tahay Dugsiga Saree e Jefferson. Waxay ku caan tahay dadaalkeeda weyn ee dhanka caawinta in ardayda u diyaar garoobaan nolosha dugsiga sare ka dib iyada oo u shaqeynaysa in ay noqoto qof isku xirta shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta.

- **Maamulaha Sanadka:** Maamulaha Scott ee McCarter ayaa PTA ay leedahay kala qayb gashay sharfida iyaga la sharfayay. Iyada oo ku jirta sanadkeedii horreeyay ee ay joogto Scott, waxay soo dhawaysay bulshada isla markaana xiriiro la sameysatay ardayda, shaqaalaha iyo waalidiinta.
- **Abaalmarinta Geesinimada:** Waxaa la siiyay qof tabaruc ah, sharaftani waxaa heshay Christine Vial oo ka tirsan Dugsiga Hoose ee James John, taasi oo la xiriirta isku duwida dhacdooyinka tababarucayaasha, caawinta shaqaalaha iyo u adeegida guddiga PTA.

**Ciyaartooyda PIL oo ku guuleystay horyaalada ciyaaraha fudud:** Laba ciyaartoy oo ka socda Naadiga Dugsiyada Ka Dhexeeya ee Portland ayaa ku guuleystay horyaalada gobolka ee ciyaaraha fudud ee OSAA Class 6A oo ka dhacay Kulliyadda Bulshada ee Mt. Hood oo ku taala Gresham. Ardayga ciyaartooyda sanadkii u dambeeyay dhigta Benson ee Jaylen Russell ayaa ku guuleystay orodka biraha laga boodo 'hurdles' ee 300 mitirka ah iyada oo ardayga ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigta Franklin ee Charlie Robertson uu qaaday 3,000 mitir.

Ardayga ciyaartooyda sanadkii u saddexaad dhigta Benson ee Micah Williams oo si aad ah loogu waday in uu ku celiyo guushii uu hore uga gaaray horyaalka dhanka 100 iyo 200 ayaa awoodi waayay in uu tartamo iyada oo dhaawac cagta ka soo gaaray.

**All-PIL baseball-ka, softball-ka:** PIL ayaa ku dhawaaqday dhammaan kooxaha baseball-ka iyo softball-ka, iyada oo lagu soo xushay cod bixin ay sameeyeen tababarayaashu.

Marka ay noqoto baseball-ka, ardayga ciyaartooyda sanadkii u dambeeyay dhigta Grant ee Kenji Lamdin ayaa loo coddeeyay in uu yahay Ciyaaryahanka Sanadka, iyada oo ardayga ciyaartooyda sanadkii u dambeeyay dhigta Wilson ee Tavares Tim loo soo xushay in uu yahay Kubad Tuuraha Sanadka 'Pitcher of the Year', iyada oo Matt Kabza oo ka socda Grant ayaa loo doortay in uu yahay Tababaraha Sanadka. [Fiiri liiska dhammaan kooxaha horyaalka.](#)

Marka ay noqoto softball-ka, ardayada ciyaartooyda sanadkii u dambeeyay dhigata Franklin ee Maggie Brauckmiller ayaa loo coddeeyay in ay tahay Ciyaaryahanada Sanadka, ardayada ciyaartooyda ah ee sanadka labaad dhigata Franklin ee Edith Ailee Pederson ay loo coddeeyay in ay noqoto Kubad Tuurtada Sanadka 'Pitcher of the Year', iyada oo tababarayaasha ka kala tirsan Roosevelt ee Faith Collar iyo Katie Meyer ee Benson loo coddeeyay in ay yihiin Wada-tabarayaasha Sanadka. [Fiiri kooxda horyaalka baseball-ka oo dhan.](#)

**Macallimiinta PPS oo wax ka bartay ganacsiga:** In ka badam 220 macallimiin, oo ay ku jiraan 33 macallin, la-taliyayaal, maamulayaasha dugsiyada iyo maamulayaasha caadiga ah oo ka kala socda PPS, ayaa waxay bardeen dhismaha iyo wax soo saarka intii lagu jiray dhacdada Warshada/Ganacsiga loogu talagalay Maalinta 'Industry for a Day' oo uu soo abaabulay barnaamijka All Hands Raised. Macallimiinta PPS waxay booqdeen sida shirkadaha Boeing Portland, ON Semiconductor, Portland General Electric iyo Sheet Metal Institute si ay wax uga ogaadaan fursadaha iyo dariiqooyinka loogu talagalay ardayda ee dhanka shaqooyinka leh mushahar lagu noolaan karo.

"Waan ku faraxsanahay helitaanka barnaamijyada gaarka ah ee ah in shirkaduhu ay intaa si firfircoon shaqada wax u qaadanayaan taasi oo loogu talagalay dadka dhallinyarada ah," ayay sheegtay Beth Biagini, oo macallimada sayniska ka ah Dugsiga Sare ee Franklin. "Tani waa mid aad u xiiso leh, in ardayda loo furo mustaqbal suurtagal ah iyada oo aanay jirin deyn 'debt' la xiriirta kharashka waxbarasho ee kulliyadeed."

[Ogow waxyaabo dheeraad oo ku saabsan Warshada/Ganacsiga loogu talagalay Maalinta 'Industry for a Day'](#)